# Qaynuunka Hawlaha Sixitaanka

**WAA MAXAY**: Hawlaha Sixitaanka. Xeerka Bilaabida Hore (Early Start Act) wuxuu ka doonaya kaqaybgalayaasha Early Achievers ee aan ku soo buuxin heerka qiimaynta waajibka ah waqtigii loo qoondeeyey, inay ka qeybgalaan hawlaha sixitaanka oo ilaa 6 bilood ah si ay u helaan dib u qiimeynta laga doonayo heerka daryeelkooda hore iyo nooca waxbarashada.

**KUMA**: Ka qeybgalayaasha bixiya adeegyada Barnaamijka Gargaarka iyo Waxbarashada Hore ee Carruurta (ECEAP) ee aan lagu qiimeyn Heerka 4 ama 5 waqtigii laga doonayay. Bixiyeyaasha u adeegga carruurta hesha Kaalmada Daryeelka Carruurta ee Ku Xiriirinta Shaqaynta (WCCC) iyo Ka qeybgalayaasha barnaamijka Iskaashiga Daryeelka Carruurta ee Early Head Start (EHS/CC) ee aan lagu qiimeyn Heerka 3, 4 ama 5 waqtigii laga doonayay.

**GOORMA**: Ka dib markii ay ka hoose maraan heerka looga baahan yahay dhamaadka waqtiga loo xilsaaray qiimeynta.

**Waayo**: Hawlaha saxitaanku waxay ka caawin karaan ka qaybgalayaasha inay kor u qaadaan tayada waqtiga dib u qiimaynta si ay u ilaaliyaan inay u sii socoto iskaashiga maaliyada ECEAP, WCCC ama EHS/CC.

**Jadwalka waqtiga:**

**30 casho gudahood ku wargelinta qiimeynta-**ka qaybgalayaasha doortay inay racfaan ka qaataan Qiimeynta Early Achievers waa inay soo buuxiyaan habkan 30 casho gudahood marka lagu soo wargeliyo qiimeynta.

**60 casho gudahood ku wargelinta qiimeynta:**

- Ka qaybgalaha Early Achievers ayaa la kulmi doona tababaraha si ay dib ugu eegaan xogta qiimeynta xarunta si loo ogaado meel kasta oo aan soo buuxin heerarka iyo fursadaha koritaanka.
- Tababaraha iyo shaqaalaha ay khuseyso ayaa kulmi doona si ay u abuuraan Qorshaha Hagaajinta Tayada (QIP), kaaso uu Tababaruhu ku qori doono WELS furaha ka hooseeya "QIP".
    - QIP waa in uu lahaada qorshe hawleedka qeyb kasta oo heerarka aan la soo buuxina.
    - QIP waa in lagu qeexaa doorarka iyo mas'uuliyadaha labada Tababaraha iyo Macallinka(miinta) mudada Hawlaha taakuleyntu socdaan oo dhan.
    - Haddii ay khuseyso, QIP wuxuu u sheegi doonaa ka qeybgalaha waraaqaha aay tahay inuu soo buuxiyo ee la xiriira meelaha heerarka aan la soo buuxin (Tusaale: "Buuxi liiska/qoraalada ka hadlaya shayga X ee ECERS-R")
    - Haddii ay khuseyso, QIP waxa uu sheegi doonaa taariikhaha tababarka fool-ka-fool ah (Tusaale: ka qeybgal "ECERS Deep Dive" Desember 7-deeda).

**60 casho ka dib ogaysiinta qiimeynta waxaa bilaabanaya Hawlaha Sixitaanka:**

- Taariikhda Hawlaha Sixitaanka waxaa si toos ah loogu qorayaa MERIT.
- Ka qaybgalayaasha ku shaqeeya jadwalka sannad dugsiyeedka waxa loo ogol yahay in wax laga bedelo waqtiyada hawlahooda sixitaanka haddii ay ku dhacaan 2 bilood ee isku xiga ee aanay u adeegayn carruurta iyo shaqaalaha aanay joogin. Ka qeybgalayaashani waa inay u soo diraan koobi jadwalkooda rasmiga ah oo muujinaya bilaha ay shaqeeynayaan qris@del.wa.gov. Shaqaalaha DEL ayaa dib u eegid ku sameeyn doona jadwalka iyo wax ka bedeli doonaan waqtiyada hawlaha sixitaanka ee MERIT si ay uga saaraan mudada aanay u adeegayn carruurta iyo shaqaalaha maqan yihiin. Tusalayaasha waqtiyadu waxay ku yaaliin dhamaadka dukumeentigaan.

**Inta u dhaxaysa 1-60 casho biloowga Hawlaha Sixitaanka:**

- Tababaraha iyo shaqaalaha ay khuseyso ayaa ka qayb qaadan doona hawlaha tababarka iyo qorsheeynta horumarinta xirfadeed.
- Tababaraha iyo shaqaalaha ay khuseyso ayaa isticmaali doona Tababaridda Saaxiibnimo ama habab kale si ay u muujiyaan dhaqankooda iyo u sii wadaan sameeynta horumarinta hadafyada.
- Ka dib markii ay dib u eegaan ka qaybgalaha, tababaraha, ama milkiilaha/qandaraaslaha, kaasoo qeybgalayaashu waxay dejisan karaan hadaf cusub si ay uga caawiyaan xarunta iyo shaqaalaha sii waditaanka sameeynta horumarinta tayada.

**Inta u dhaxaysa 60-120 casho biloowga Hawlaha Sixitaanka:**

- Tababaraha iyo shaqaalaha ay khuseyso ayaa dib u eega horumarka ay ka gaareen qorshe hawleedyadii.
- Warbixinta horumarka qeyb kasta oo heerarka aan la soo buuxina, oo ay ku jiraan taariikhaha dib u eegista, waxaa ku diiwaangelinaya Tababaraha WELS, furaha hoos taga 'Notes'.

**120 casho ka dib biloowga Hawlaha Sixitaanka:**

- Tababaraha iyo shaqaalaha ay khuseyso ayaa ka wada xaajoon doona diyaar u ahaanta dib u qiimeynta, iyo horumarka dokumentiga ee WELS, furaha hoos taga 'Notes'.
- Xiriiriyaha Koowaad ee QRIS ayaa gaari doona go'aanka kama dambaysta ah ee ku saabsan meelaha Xadadka Tayada ee ay tahay in dib loo qiimeeyo.

**Maalinta 120 ama ka hor (afar bilood) markii la bilaabay Hawlaha Sixitaanka ayaa codsiga dib u qiimeynta uu soo gudbin karaa Xiriiriyaha Koowaad ee QRIS, Qandaraaslaha ECEAP ama Milkiilaha Head Start.**

**60 casho gudahood, ka dib markii la soo codsaday dib u qiimeynta (qiyaastii 180 casho ka dib markii la bilaabay Hawlaha Sixitaanka):**

- Aruurinta macluumaadka dib u qiimeynta ayaa dhici doona.
- Dhibcaha dib u qiimeynta ayaa la soo saari doona.

**La xisaabtanka Tababaraha iyo Xubinta**

- Si loo hubiyo ka qaybqaadashada firfircoon in la caddeeyo, Tababarayaasha waa inay cusboonaysiiyaan QIP oo ay ku qoraan qoraalada WELS wax aan ka yarayn hal mar bishii muddada sixida.
- Qorshaha Hagaajinta Tayada ee WELS waa inay ku jiraan dhammaan qoraalada la xiriira horumarka intii lagu jiray mudada hawlaha sixida.
- Tababaraha iyo Xiriiriyaha Koowaad ee QRIS ayaa hubin doona ugu yaraan bishiiba mar in dib loo eego horumarka hadafyada iyo in la hubiyo in Xiriiriyaha Koowaad ee QRIS hayso khayraadka loo baahan yahay si loogu guulaysto qiimeynta dhamaadka muddada 6 bilood ah ee hawlaha sixida.

**Tusaalaha Sannadka Buuxa**




**Tusaalaha Sannadka Barkiisa**




Dhaqangalay Abriil 15, 2016